3

Masruufka Caruurta

SOM 003

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Masruufka Caruurta

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Caruurta waxay xaq u leeyihiin in labada waalidba ay ka helaan masruufkooda. Haddii adiga iyo waalidka labaad aadan wada nooleyn, waa in aad qeybsataan kharashka caruurta.

Haddii adiga ay caruurta si sharci ah kugula joogaan (macnaha ay adiga kula noolyihiin inta badan), waxaad xaq u leedahay in waalidka kale uu bixiyo masruufka **caruurta**. Waalidkan waxaa lagu magacaabaa **bixiye**. Waalidka bixiyaha ah waa midka caruurta dhalay ama midka korsaday. Ruuxa korsaday caruurta oo waalidnimo horey u muujiyey asaguna waa in uu bixiyaa masruufka caruurta.

Sidee loo helaa masruufka caruurta

Adiga iyo waalidka kale oo caruurta dhalay waad ku heshiin kartaan bixinta masruufka caruurta. Haddii aad ku heshiin weydaan xisaabta, ama la fulin waayo heshiiska, waxaad weydiisan kartaa maxkamadda in ay bixiso amarka bixinta masruufka caruurta. Haddii aad sharci u leedahay haynta caruurta oo aadna u baahantahay in lagu siiyo caruurta masruufkooda, la hadal ruux qareen ah.

Intee muddo ah ayuu waalidka kale bixinayaa masruufka caruurta?

Masruufka caruurta bixintiisa waa in ay socotaa inta uu canugga u baahanyahay. Sida ay u badantahay, waa ilaa iyo inta uu 18 jir ka gaaro canugga. Canugga 18 jir ka yar oo guursado ama aqalka ka baxa oo is dabara uma baahna masruuf. Waalidka bixiyaha ah waa laga yaabaa in uu sii wado bixinta lacagta xitaa haddii canugga uu 18 jir ka bato haddii uusan canugga is dabiri karin cudur awgiis, ama curyaan yahay ama uu yahay arday si buuxda iskuul u dhigta.

Sidee ayey maxkamadda u xisaabtaa qiyaasta lacagta masruufka la bixinaayo?

Dowladda sare iyo tan gobolka ayaa go'aamisa lacagta ugu yar ee uu bixinaayo waalidka masruuf bixiyaha ah. Lacagta la bixinaayo waxay ku saleysantahay qiimaha nolol maalmeedka ee gobol kasta ka jira. Habka lacagtan loo bixinaayo waxay ku qorantahay buuga **Tilmaan Bixiyaha Masruufka Caruurta**. Buugan waxaa la casriyeeyey sanadkii 2006. Maxkamadaha kolka ay go'aaminayaan codsiga bixinta masruufka caruurta waa in ay go'aankooda ku saleeyaan buuga Tilmaan Bixiyaha ah.

Lacagta ugu yare e uu bixinaayo waalidka bixiyaha ah waxaa laga xisaabaa:

- inta uu la egyahay **dakhliga guud** ee soo gala waalidka bixiyaha ah. Taas waxaa loola jeedaa guud ahaan inta uu la egyahay dakhliga qofka inta aanan laga jarin canshuuraha dowladda ama wixii kale oo laga jari lahaa
  iyo
- tirada caruurta kale oo masruuf ka raba waalidkan bixiyaha ah.

Maxkamadda ma raaci doonto Tilmaan Bixiyahay Masruufka Caruurta haddii

- canugga ay da'diisa ka badantahay 18 jir,
- canugga uu la noolyahay ugu yaraan 40% labada waalidba, ama,
- haddii ay waalid u yihiin caruur badan oo ay kala qeybsadeen xanaanadooda.

Haddii arrintan ay dhacdo, maxkamadda waxay eegeysaa xaalka dhaqaale ee qoyska. Bixinta masruufka caruurta waxaa lagu saleyn doonaa dhaqaalaha soo gala labada waalid iyo inta ay caruurta u baahan karaan.

Badanaaba, maxkamadda waxay ku xukuntaa waalidka bixiyaha ah in uu bixiyo masruufka nolol maalmeedka caruurta oo ku beegan inta lagu xusay buuga Tilmaan Bixiyaha ah. Haseyeeshee, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo lacag intaa ka badan haddii ay jirto **baahi gaar ah**, sida kharashka ku aadan xanaanada caruurta iyo waxbarashada ama kharashka caafimaadka canugga ku saabsan oo noqda mid aan caadi ahayn. Haddii uu canuggaada uu qabo baahi gaar ah, adiga iyo waalidka kale waa in aad wada qeybsataan kharashkaas. Qeybta uu qof kasta bixinaayo waxay ku xirantahay dakhligaada.

Marar dhif ah, waxaa laga yaabaa in maxkamadda ay hoos u dhigto qiyaasta lacagta masruufka ah. Arrintan hoos u dhigidda lacagta ah waxay maxkamadda sameyneysaa marka ay u aragto in waalidka bixiyaha ah ay **dhibaato** dhaqaale uga imaan karto haddii la raaco buuga Tilmaan Bixiyaha ah. Waa marka ay arrintan kallifi karto in nolol maalmeedka qofka uu cariiri galo. Sidoo kale, maxkamadda waxay hoos u dhigi kartaa bixinta masruufka kolka waalidka bixiyaha ah uu yahay qof curyaan ah ama uu caruur kale masruufo.

Waalidka bixiyaha ah lacagta uu masruuf ahaan u bixiyo kama codsan karo canshuur celin. Adiguna ma ahan in aad u cadeysid dakhli ku soo galay oo kale.

Wax ma ka bedeli karaa xukunka ku aadan lacagta masruufka loo bixiyo?

Haddii adiga iyo waalidka kale aad go'aan ku gaartaan in aad wax ka bedeshaan xukunka lacagta masruufka ah, waa in aad heshiis cusub wada gashaan. Haddii aad ku heshiin waydaan, qof idinka mid ah ayaa maxkamadda weydiisanaayo in xukunka jiro wax laga beddelo. Arrintan waxaa lagu macagaabaa **wax ka beddelid** xukunka masruufka caruurta. Maxkamadda waxaad ka codsan kartaa in tirada lacagta masruufka loo bixiyo wax laga beddelo, ama shuruudaha jira wax laga beddelo.

Maxkamadda waxay xukunkan wax ka beddeleysaa oo keli ah haddii uu dhaco isbedel wayn, sida waalidka bixiyaha ah oo dakhligiisa kordho ama yaraado, xaaladda canugga oo wax iska beddela ama haddii ay soo baxaan kharashyo gaar u ah canugga oo cusub.

Xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadka ku saaran

Marka aad codsato masruufka caruurta, waxaad leedahay xaq, waxaana ku saran waajib.

1. Xaq waxaad u leedahay in aad ogaato dakhliga soo galo waalidka bixiyaha ah

Haddii aad codsato in lagu siiyo masruufka caruurta, waxaad xaq u leedahay in aad run ahaan u ogaato dakhliga soo gala waalidka kale. Arrintan waxaa la yiraahdaa **soo bandhigidda dhaqaalaha** qofka kale. Si aad u hubsato in lacagta la bixiyo ay mid sax ah tahay, waxaad xaq u leedahay in si buuxda laguu tuso sanadkiiba mar dakhliga soo gala waalidka bixiyaha ah.

Mararka qaar waxaa dhacda in waalidka bixiyaha ah uusan wada shaqeyn muujinin. Waxaa dhici karta:

- in uusan ku siinin xogta aad codsatay, ama
- uu doorbido in uusan shaqeynin ama lacag yar ku shaqeeyo si uusan u bixinin masruufka caruurta.

Haddii ay taasi dhacdo, maxkamadda waxay qiyaaseysaa lacagta soo gasha ama soo geli karta ruuxaas. Arrintan waxaa lagu magacaabaa xukunka **dakhli qiyaasidda** qofka kale. Maxkamadda waxay isticmaaleysaa dakhligan la qiyaasay si ay ku gaarto qiyaasta lacagta loo bixinaayo masruufka caruurta.

2. Waalidka Lacagta Cayrta ah ku nool

Haddii aad ku nooshahay **lacagta cayrta** ah (nooca *Ontario Works ama Ontario Disability Support Plan*) waa in aad waalidka kale ka codsataa in uu bixiyo masruufka caruurta. Haddii aadan sidaa yeelen lacagta cayrta ah waa lagaa jaran doonaa. Haddii aad qaadato lacagta cayrta ah, inta laguu siiyo masruufka caruurta oo idil waa laga jarayaa lacagta cayrta aad qaadato bil kasta.

Haddii aadan haysan amarka ku aadan xukunka lacagta masruufka caruurta, dowladda ayaa kuu codsan karto maxkamadda in laguu xukumo. Waxaa adiga lagaa filayaa in wada shaqeyn ku aadan codsigan xukunka ah lagaa helo. Dowladda waxay gaari kartaa go'aanka ah in aysan dabagelin bixinta masruufka haddii ay la noqoto in ay dhib tahay sida loo heli lahaa waalidka bixiyaha ah ama haddii uu waalidkan horey kuugu xadgudbay ama nafsaddaada looga baqaayo dhibaato.

Waalidka cayrta ku nool xitaa waxaa laga sugayaa in uu bixiyo masruufka caruurta haddii lacagtiisa ay ka badantahay $6,700 sanadkiiba.

Yaa hirgelinaayo xukunkan?

Xukunka bixinta masruufka caruurta waxaa hirgelinaayo **Xafiiska Waajibaadka Qoyska** [**Family Responsibility Office** (FRO)]. Waa xafiis hoostaga dowladda dhexe. Xukun kasta oo ku saabsan masruuf waxaa si toos ah looga diiwaan geliyaa xafiiska FRO. Haddii adiga iyo waalidka kale aad go'aan isla gaartaan waa in aad nuqul go'aankaas ku saabsan siisaan xafiiska FRO si loo hirgeliyo.

Sidee ayuu u shaqeeyaa xafiiska FRO?

Kolka xafiiska FRO la soo gaarsiiyo amarka xukunka, waalidka bixiyaha ah waa in uu lacagta u soo gudbiyaa xafiiskan. Marka xafiiskan FRO uu lacagta gacanta ku dhigo adiga ayuu kaddibna kuu soo gudbin doonaa.

Xafiiska FRO wuxuu maamulaa qoysas fara badan. Sidaa darted bacdamaa uu xafiiskan howlo badanyahay waxaa laga yaabaa in aad sugtid lacagtaada muddo bilooyin ah.

Maxaa dhacaya haddii bixiyaha uu bixin waayo lacagta?

Mararka qaar waxaa dhacda in bixiyaha uu ka daaho bixinta ama uu gafo bilooyin. Haddii ay taasi dhacdo xafiiska FRO si uu lacagta ku helo wuxuu sameyn karaa:

- Haddii uu qofkaas shaqeeyo, madaxdiisa ayaa laga codsanayaa in lacagta masruufka laga jaro mushaarka qofka.
- Haddii bixiyaha uusan shaqeynin ama iskii uu u shaqeysto, xafiiska FRO wuxuu isku dayayaa in uu koontada bangiga qofkaas uu si toos ah ugala baxo lacagta masruufka. Arrintan waxaa lagu magacaabaa **faragelinta** ruuxa koontadiisa bangiga. Xafiiska FRO wuxuu kaloo sameyn karaa in uu ka **xannibo** iibista handida uu leeyahay ruuxaas sida iibista baabuurkiisa ama gurigiisa. Haddii uu qofkaasi isku dayo in uu iibiyo hantidiisa, xafiiska FRO wuxuu halkaa kala baxayaa lacagtii ruuxaas lagu lahaa.
- Haddii uu bixiyaha uu yahay ruux had iyo jeer la daaha lacagta ama lacag tiro badan lagu leeyahay, xafiiska FRO wuxuu isku dayayaa in uu ka xannibo shattiga baabuur wadidda iyo shaddiyada kale sida midka ugaarsiga iyo kaluun dabashada. Baasaboorka ayaa laga nasakhi karaa. Lacagta uu qofkaasi dowladda ku leeyahay ayaa laga qaadan karaa sida lacagta canshuur celinta ama lacagta shaqo la'aanta loo siiyo (employment insurance benefits).

Maxaa dhacayo haddii bixiyaha uusan ku nooleyn gobolka Ontario?

Xafiiska FRO wuxuu kaa caawini karaa in uu bixiyaha ka soo qaado lacagta masruufka haddii uu ku noolyahay meel kasta oo ka mid ah waddanka Kanada ama Mareykanka. Taasi waxaa suuro gal ka dhigeyso heshiisyada ka dhaxeeyo gobollada Kanada oo idil iyo Mareykankaba oo u suuro gelinaayo in xafiiska FRO ka soo uruuriyo lacagta xitaa haddii xadka laga gudbo. Gobolka Ontario wuxuu heshiis kaa la mid ah la leeyahay dowladaha Bermuda, Ghana, Hong Kong, the Czech Republic iyo United Kingdom.

Haddii waalidka bixiyaha ah uu ku noolyahay waddan aan heshiis la lahayn gobolka Ontario, xafiiska FRO ma jirto wax uu ka qaban karo xoojinta xukunkan. Sida kali ah oo wax looga qaban karo arrintan waxay tahay in la tiigsado sharciga waddankaas u degsan.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. **Masruufka Caruurta (SOM 003)**
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par :
Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.